

Orientation to Ontario

MAXKAMADA SHEEGASHOYINKA YARYAR

Guddaha Ontario, Maxkamada Sheegashooyinka Yaryar ayaa la tacaamusha khilaafaadka madaniga ah ee ee kacagta dhan ilaa CAD 35,000.00, marka laga reebo lacagaha dulsaarta ah iyo qarashaadka sida lacagta maxkamada. Tan waxaa ku jira qiimaha dhammaan badeecooyinka cabasho gudbiyaha (tusaale, dacwoode) uu codsanaayo wadarta guud.

Waa maxay noocyada kiisaska ay xaliso Maxkamada Sheegashooyinka Yaryar?

Tusaaleyaasha sheegashooyinka loo gudbin karo maxkamada Sheegashooyinka Yaryar waxaa ku jira:

Sheegashooyinka lacagta ku timaada heshiiskan, sida:

- lacagaha aan la dhiibin ee alaabta ama adeegyada la baxshay ama la geeyay
- daynta aan la bixin
- kirada aan la bixin
- jeegaga aan lacagtu ku jirin (NSF).

Sheegashooyinka waxyeelooyinka, sida:

- waxyeelada guriga
- dharka uu waxyeeleeyay mashiinka wax qalajiya
- dhaawacyada shaqsigah ah
- jebinta heshiiska

Lacag intee dhan ayaa iiga baxaysa?

Waa inaad dhiibtaa qarashka gudbinta dacwada ama difaaca ee Maxkamada Sheegashooyinka Yaryar iyo inta badan talaabooyinka dacwada. Sidoo kale waxaa jira qarashaad ay qasab tahay inaad siiso

marqaatiyaasha aad u yeeratay (laga codsaday inay maxkamada yimaadaan) oo aad ku siinayso ka qaybgalkoodaiyo lacagta safarka tagista maxkamada. Waxaa intaas dheer, waa inaad bixisaa lacagta turjumaanno kasta oo aad u baahan karto iyo turjumaanka luuqada ishaarada. Dhinaca kiiska ku raaya ayaa dalban kara in dhinac kale lagu amro inay baxshaan qarashaadka ka baxay, sida kan qarashka maxkamada.

Muddo intee dhan ayaan haystaa si aan u gudbiyo dacwad?

Waxaa jiri kara waqti loo cayimay muddada aad sugi karto kahor intaadan gudbin dacwada. Haddii aadan hubin waqtiga loo cayimay kiiskaaga, waa inaad la tashataa qareen.

Waa maxay cadaynta aan u baahan nahay si aan u taageero sheegashadayda?


Waa inaad cadayn u keentaa kiiskaaga. Ka fakar marqaatiyaasha iyo ama dukumiintiyada (tusaale ahaan heshiisyada, jeegaga NSF, diiwaannada ama lacag bixinta) ee aad haysato si aad ugu cuskado dacwadaada. Haddii aadan haysan dukumiintiyada ama marqaatiyo ku taageeraaya, sheegashadaada ayaa wali ku guulaysan kartaa. Hase yeeshee, haddii ay keliya tahay sheegashadaada qalalan oo kasoo horjeeda tan qofka kale, waxaa adkaan karta inaad cadeyso kiiskaaga.

Gofkee igu matali kara Maxkamada Dacwooyinka Yaryar?

Dacwoodeyaal badan oo Maxkamada Dacwadaha Yaryar u dacwooda ayaa naftooda matala. Hase yeeshee, waxaa sidoo

1-855-626-0002

<https://orientationontario.ca>



Funded by / Financé par :

kale ku matali kara qareen ama qof aqoonsi ka haysta Sharciga Bulshada Garsoorka, sida arday ama kaaliye qareen.

OGEYSIIS MUHIIM AH

Dawlada Ontario ayaa biloowday shahaado laga dhaafay qarashka oo la siinaayo shaqsiyaadka loo diidi karo inay sharciga adeegsadaan sababo dhaqaale awgood.

Sidee ayaan ku helayaa qareen ama kaaliye sharci?

Haddii aad dooneyso inaad la tasho qareen jooga Ontario ama kaaliye sharci oo ruqsad leh, waxaad la xariiri kartaa Adeegga Isku Xirka ee Bulshada Garsoorka. Waxaad codsi u di san kartaa Adeegga Isku xirka adoo buuxinaaya foomka codsiga ee oonlaynka ah lawsocietyreferralservice.ca

Adeegga ayaa ku siin doona magaca qareen ama kaaliye sharci oo deegaankaaga jooga, kaasoo ku siin doona talo bixin bilaash ah oo dhan ilaa 30 daqiiqo si lagaaga caawiyo go'aaminta xuquuqdaada iyo dookhyadaada.

Laynka masiibada ayaa la heli karaa Isniinta ilaa Jimcada, 9:00 ilaa 5:00 pm [416-947-5255](tel:416-947-5255) ama [1-855-947-5255](tel:1-855-947-5255) (wicitaan bilaash ah). Waxaa loogu talagalay dadka aan awoodin inay adeegsadaa adeegga oonlaynka ah.

Ka waran haddii aan u baahnahay turjumaan?

Maxkamada Dacwadaha Yaryar ayaa bixisa adeegyada turjumaanka ee dhammaan dacwadaha maxkamada oo lagu tuejumo Ingiriis lagu fasiro Faransiis iyo Faransiis lagu fasiro Ingiriis. Turjumaada Ingiriiska ama Faransiiska ee lagu fasiro luuqad kale waa in la qorsheeyaa, uuna qarashkeeda dhiibaa, dhinaca u baahan turjumaada. Xafiiska maxkamada ayaa bixin doona turjumaada "gudaha Maxkamada" ee luuqad kasta oo qofku u qalmo in qarashka laga dhaafo.

Ka waran haddii aan u baahan nahay turjumaada luuqada ishaarada ah sabab la xariirta inaan maqalka naafo ka ahay?

Haddii aad qabto naafada maqalka aadna u baahan tah y turjumaan, waxaad codsi u diri kartaa xafiiska Maxkamada Dacwadaha Yaryar. Waxaad keeni kartaa turjumaan ama waxaad codsan kartaa in lagu qabto. Maxkamada ayaa dhiibaysa qarashka turjumaannada luuqada dhagoolka oo la siinaayo qiimaha caadiga ah ee turjumaanka ee Wasaarada ama qarashka la codsaday (hadba kii qiimo jaban).

Ka waran haddii aan u baahan nahay tusmo ama foomka oo qaab kale ah?

Sida ku cad Qaybta 7 aad ee Sharciga dadka Ontario ee Naafada ah, haddii aad doonayso inaad codsato daabacaad qaab kale ah, fadlan la xariir Service Ontario Publications oo aad ka helayso: Service Ontario Publications

50 Grosvenor Street
Toronto, ON
M7A 1N8

Wicitaan bilaash ah: [1-800-668-9938](tel:1-800-668-9938)

Laynka Bilaashka lagu waco ee TTY:
[1-800-268-7095](tel:1-800-268-7095)

Si aad xog badan uga ogaato Maxkamada Dacwadaha Yaryar, booqo:

attorneygeneral.jus.gov.on.ca

OGEYSIIS MUHIIM AH

Waa muhiim inaad xasuusato in xukunku yahay amar maxkamadeed; maaha damaanad ah inaad lacagta helayso. Haddii aad kiiska ku guulaysato, qofka daynta lagu leeyahayna bixin waayo sidii la rabay, waxaad u baahan kartaa inaad qaado tallaabooyin aad qasab uga qaadayso (uga helayso) lacagta.

